
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Rabbiga Wuu Sharfay Addoon-kiisii

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson


Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Yuusuf si khalad ah buu Sayidkiisii Footiifar ugu xidhay. Xabisiga dhexdiisa, Yuusuf wuxuu ahaa nin dhaga nugul oo caawiya dadka. Ilaaliyaashii xabsig Yuusuf waxay ku aamineen inuu maamulo nolosha xabsiga, sabata oo ah Ilaah baa la jiray isaga, xabsigiina wuxuu noqday meel noloshiisa wanaagsan tahay.



Boqorka kii wax u dubi jiray iyo kii khamriga siin jiray ee ku jiray Jaylka. “Maxaad la calool xun tihiin?” ayaa Yuusuf weyddiiyey maalintaa. Nimankii dhibaataysnaa baa u jawaabay. “Ilaah wuu karaa” Yuusuf baa saa yidhi.




"Riyadaada waxay la micne tahay saddex cisho ka dib waxaad ku noqon doontaa qasriga boqor Fircoon," kii khamriga shubi jiray. "I soo xasuuso oo ii weydii inuu Fircoon inuu i sii daayo." Kii wax dubi jiray riyadiisii waxey noqotay war xun. "Adigu Saddex cisho gudohood baad ku hdimanaysa," Ayuu Yuusuf ku yidhi. Labadoodiiba riyooyinkoodii run bay noqdeen.



Laakiin khamri shubihii wuu iska ilaabay farriintii Yuusuf ilaa uu Fircoon subax dambe rabshad la soo toosay. “Waan riyooday” isaga oo ku dhawaaqaya. Midna nimankii xigmadda lahaa wey u micneyn waayeen. Markaa ka dib ayaa khamri shubihii soo xasuustay Yuusufkii ku jiray jaylka. Fircoon buuna u sheegay waxyaalihii ku saabsanaa isaga.






Fircoon dad buu u diray durbadiiba. "Riyadaada waa farriin ka timid Ilaah" ayuu yuusuf ku yidhi boqorkii. "Masar waxaa imna doona toddoba sanadood oo barwaaqo ah, ka dibna todoba sanadood oo abaaar ah."



"Qorshee iminka oo keydi cuntada toddobada sanadood ee barwaaqada ah." Ayuu Yuusuf Fircoon kula taliyey. "Ama dadkaadu gaajada abaarta ba'an bay la dhiman doonaa." "Ilaah baa kula jira," Fircoona wuu caddeeyey taasi. "Masar oo idil adigaa xukum oo ah kan igu xiga aniga keliya."



Toddobadii sanadood ee barwaaqa ahayd ayaa la gaaray. Ka dib toddobadii sanadood ee abaarta ahayd ayaa timid. Cuntadiina wey ka dhaamaatay meel walba Masar mooyee oo horey u keydsatay cunto badan oo dadka u qaybisa. Yuusuf reerkoodii meeshii fogeyd deganaa. Yacquub




qoyskiisii wey gaajoodeen.

Dadkii waddamada kale oo idil waxy yimaadeen Masar si ay hadhuudh uga iibsadaan. “Masar waxaa yimid wiilashii oo u soo diyar garoobay iney cunto iibsadaan.”




Yacquub wiilshiisii waxay ku hor sujuudeen Sayidkii ugu sareeyey Masar. Ma asysan garan karin Yuusuf, kii walaalkooda ahaa. Laakiinse Yuusuf wuu gartay walaalihii. Yuusufna wuxuu soo xusuustay riyooyinkiisiii cruurnimo. Ilaah baa ka sareysiiyey walaalihii.



Yuusuf xigmad buu lahaa. Si kulul buu ula hadlay deedna walaalkii Simon buu rahan ula hadhay. "Qaata cuntada oo gurigiina geeye oo la imaada walaalkiin kan ugu da'da yar," ayuu ku amray.




Kolkaa ka dib waxaan garan doonaa inaad tihiin basaasiin. Walaalihii waxay ku fikireen inuu Ilaah ku ciqaabayo iibintii ay iibiyeen Yuusuf sidii addooon oo kale waagii hore.



Wiilashii Yacquub wey wareereen/siku-buuqeen.
"Lacagteenni waxey inooga soo dhex noqtay hadhuudhka dhexdiisa. Oo sayidkiina u talinayaya wadankaa wuxuu nagu yidhi ii keena Benyamiin."



Yacquubna inagama yeelayo inuu Benyamiin ka socdo. Laakiin durbadiiba cuntadii waa la isticmaalay oo idlaatay. Walaalahii waa in ay Masar ku noqdaan. Benymiinn ahorey buu u raacay.




Markii uu Yuusuf arkay Benyamiin Addoomadiiisii buu amar ku siiyey inyay diyaar gareeyaan xaflad weyn. Walalihiina waa lagu casuumay. Yuusuf ba weyddiiyey "AAbbihiin miyuu nool yahay oo caafimaad qabaa?" Laga yaabee inuu damacsanaa oo uu ku fikirayay siduu reerka oo idil oo wadajira ku soo rari lahaa.



Weliba Yuusuf wuxuu doonayay inuu ogaado walaalihii inay ka xun yihiin dembiyadooda sanadihii hore ay ku kaceen. Casuumddii ka dib wuxuu ku eedeeyey iyagii xatooyo tuuganimimo. La idinkuna ciqaabayo.



“Aniga inaan haysanayo Benyamiin si uu addoonkayga u noqdo.” “Sayidow nafta iga qaad aniga,” ayuu ku baryootamay Yuudah. Yuusuf wuu gartay inuu yahay Yuudah, oo ahaa kii




go’aamiyey in Yuusuf la iibiyo. Runtiina wuu isbedelay.




Intaa ka badan ma uusan qarin kareyn jaceylka uu uqabo qoyskiisa, Yuusuf Masaaridii buu dibaddda isaga bixiyey. Dabadeedna wuxuu bilaabay inuu ooyo. "Waxaan ahay walaalkiinii aad ka iibsateen Masar," la yaab, filan waa iyo cabsi, waxba way odhan waayeen.

Yuusuf wuu dhiirra-geliyey walaalihii.
"Ilaah baa Sayid iiga



dhigay Masar
haddaba waan
idinka badbaadin donna
abaarta. Orda oo
Aabahay ii keena. Waan
idin dhaqaalayn doonaaye."



Yacquub iyo
Yuusuf Masar bay
ku wada dib ugu
midoobeen oo reerkii oo
idil nabad iyo barwaaqo
ayay u haatay.

Rabbiga wuu Sharfay Addoonkiisii

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 39-45

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

8

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16